



## **Warbixinta**

### **Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**

*16 Apríll -24 June 2013*

***August 2013***

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**

## **Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

### **Ujeedo:- Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**

#### *Mudanayaal*

Si aad hawlaha u qorshaysan **kal-fadhiga 22<sup>aad</sup>** ee Golaha Wakiilada u dardar galino una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 21<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan.

### **Ajandaha Kalfadhiga 21<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.**

27/04/2013

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogogaal u noqoshada xaalada dalka
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Xeerka Booliska	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Gudi Gaar ah
2.	Waxkabadalka Xeerka Qareenada	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Gudi Gaar ah
3.			
4.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo ku-xigeenka	Akhriska 2 <sup>aad</sup>	Gudi Gaar ah
5.	Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Banka	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gudidda Dhaqaalaha
6.	Xisaab-xidhka Dawladda ,2010, 2011	Golaha	Xoghaynta
7.	Xeerka Statistics law	Guurtida	Codayn
8.	Xeerka Caasimada	Mooshin	Mooshin
9.	Xeerka Shidaalka iyo Macdanta	Akhriska 1aad	Gudidda Khayradka dabiciga

4. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
5. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
6. Xeeraka ka soo noqda Golaha Guurtida
7. Iyo Wixii kale ee soo kordha.

## **1. Kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	21 <sup>aad</sup>	20/04/2012	24/06/2013

Kal-fadhigan oo Golahu qabtay hawlo oo muhiim ah sida ansixintii Masuuliyiinta Qaranka 2013ka, Ansixinta 3 Xeer iyo Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka, waxaan halkan idiinku soo Gudbinaynaa dhamaan Waxqabadkii Gole weynaha, Shir-gudoonka iyo Gudiyada Golahaba oo kala ahaa sidan soo socota.

## **2. Xeerarka Goluhu ka doodey:-**

No	Magaca Xeerka	Watkhtiga laga doodey
1.	Xeerka Booliiska Akhriskiisii 2aad	
2.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Hore Akhriskiisii 2aad	
3.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada	



## **3. Xeerarka Goluhu Ansixiyey**

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
1.	Xeerka Istaatistikada	----/----/2013	Madaxweyne
2.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada	----/----/2013	Madaxweynaha

3.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka	----/----/2013	Madaxweynaha
----	---	----------------	--------------

#### 4. Motionada Golaha La horkeenay

<u>Motion</u>	<u>Cida keentay</u>
Motionka Xeerka Caasimada	Mudanayaasha Golaha Wakiilada
Motionka Xeerka Shidaalka	Mudanayaasha Golaha Wakiilada

#### 5. Masuuliyiinta Goluhu Qaran ee Goluhu Ansixiyey

<u>No.</u>	<u>Magaca Masuulka</u>	<u>Xilka loo Ansixiyey</u>
1.	Md. Nuur Cismaan Guutaale	Wasiir Ku-xigeenka Cadaalada
2.	Md. Aadan Diiriye Cigaal	Wasiir Ku-xigeenka Ganacsiga

#### 6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey



<u>No</u>	<u>Masuulka</u>	<u>Xilka</u>
1.	Md, Maxamed Nuur Caraale	Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha
2.	Md. Cabdri Dirir	Gudoomiyaha Baanka dhexe
3.	Md. Maxamed C/laahi Cumar	W. Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
4.	Md. Faarax Cilmi Geedoole	W. Wasaarada Beeraha
5.	Marwo. Zamzam Cabdi Aadan	W. Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare

6.	Md. Maxamuud Dheere	Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka
----	---------------------	--------------------------------

## **7. Xeerarka Gudiyadu Hayaan**

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
<b>1.</b>	<b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Midaynta Cashuuraha</li> <li>• Xeerka Caymiska Qaranka</li> <li>• Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency</li> <li>• Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka</li> </ul>
<b>2.</b>	<b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.</li> <li>• Xeerka Maxaabiista</li> <li>• Xeerka Gudidda Aasaaska Komishanka Dib u-habeynta shuruucda</li> </ul>
<b>3.</b>	<b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>
<b>4.</b>	<b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose</li> <li>• Xeerka Saxaafada</li> <li>• Xeerka Ciyaaraha</li> <li>• Xeerka Hay'adda HIV/AIDSka</li> </ul>
<b>5.</b>	<b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>
<b>6.</b>	<b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Horumarinta Wadooyinka</li> </ul>
<b>7.</b>	<b>Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka shidaalka (patrolium Act)</li> <li>• Xeerka Macdanta (Miniral Act)s</li> </ul>
<b>8.</b>	<b>Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa</b>

## **8. Waxqabadka Guddiyada Golaha**

### **Gudidda Joogtada iyo anshaxa.**

Guddigu iyadoo ka wakiila fasaxayada Golaha waxay intii fasaxa lagu jirey iyadoo la kulamay masuuliyiin qaran oo farbadan. Gudidda yagoo ka dulaysa wajibadkeda dastuurka iyo Xeer-Hoosadka Golaha muhiimadana sinayaa xilgudashada hawlaha Qaran Wasaaradaha iyo Ha'ayadaha Dawlada. waxay kulan xog-waran la yeelatay:-

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**



- Shir-gudoonka Golaha Wakiilada JSL.
- Wasiirka Arrimaha Gudaha



### **Gudidda dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada**

Waxay Gudiddu Goleweynaha uga soo tala bixisay Wasiirka ku-xigeenka Wasaarada Ganacsiga **Md. Aadan Diiriye Cigaalka** dib markii ay Wajibkoodii Sharci ka soo guteena waxay Golaha u soo jeediyeen in Xilkaa loo ansixiyo.

Waxay Gudiddu kulan shaqo la yeelatay Wasiirka Wasaarada Qorsheynta Qaranka **Md. Sacad Cali Shire** taarkiikhdu markay ahayd 06/082013, kulankaas oo Wasiirku Gudidda Warbixin ka siinayay programka NEW DEAL.

### **Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga.**

Gudiddu waxay kormeer ku tagtey Gobolka Togdheer markay taariikhdu ahayd 01/08/2013, kormeerkan oo u jeedadiisu ahayd inay warbixin guud ka helaan arrimaha Shidaalka ku saabsan eek a socda Goboolkaa iyadoo Gudiddu gacanta ku haysa Xeerka shidaalka oo xogta ay ka soo ururiyeen Gobolka togdheer wax badan ka tari doonto Xeerkaa.

### **Gudidda Cadaaladda, Garsoorka, Xuquuqal insaanka iyo Dastruurka.**

Waxay Gudiddu Goleweynaha uga soo tala bixisay Wasiirka ku-xigeenka Wasaarada Cadaalada **Md. Nuur Cismaan Guuteeleka** dib markii ay Wajibkoodii Sharci ka soo guteena waxay Golaha u soo jeediyeen in Xilkaa loo ansixiyo Wasiir Ku-xigeenka.

## **9. Waxqabadkii Gudiyada Gaarka ah (Adhoc Committees)**

Saddex Guddi hoosaad oo Gaara ( Adhoc Committee) ayuu Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup> Goluhu u saaray inay Dib-u eegis ku soo sameeyaan Xeerarka kala ah Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Qareenada, Xeerka Booliiska iyo Xeerka

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 21<sup>aad</sup>**

Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka, waxay kal-fadhigii 21<sup>aad</sup> saddexdaa Guddi ee gaarka ahi Golaha u soo gudbiyeen isla markaana tala-bixintoodii Golaha ku soo celiyeen, waxay kala ahaayeen Gudiyadaasi:-

- ✓ Gudiddii loo saaray W. iyo Kaabista Xeerka Qareenada
- ✓ Gudiddii loo saaray Xeerka Booliiska
- ✓ Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka.

## **10. Hay'adda IRI oo Qalab Ku wareejisay Golaha Wakiilada.**

08/07/2013 waxa hay'adda IRI ay ku wareejisay, Golaha Wakiilada qalab ka kooban:-

1. Laba laptop
2. Hal printer
3. Laba kamaradood (picture and movie)



Kulankan lagula kala wareegayay qalabka oo lagu qabtay Xafiiska Guddoomiha Golaha Wakiilada ayaa waxaa ugu horayn waxaa halkaa ka hadlay madaxa hay'adda IRI oo sheegay inay qalabkani uu ka mid yahay caawimada ay siiyaan Goleyaasha Baarlaamka oo hay'addoodu la shaqayso, isagoo sheegay inuu rajaynayo in Goluhu si wacan uga faa'idaysan doono qalabkan.

Waxa kale oo isaguna madasha ka hadlay Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane C/raxmaan Maxamed C/laahi kaas oo sheegay inay aad ugu

mahadnaqayaan hay'adda IRI qalabkan ay ku caawisay Golaha isaga oo sheegay in qalabkani wax badan ka caawin doono habsami u socodka shaqada Golaha, islamarkaana uu yahay mid loo baahnaa.

Sidoo kale waxa uu sheegay Guddoomiyuhu, in ay jecelyihiin in hay'addani ay Golaha ka la shaqayso xaga tayaynta (capacity Building) iyo tababarka shaqaalaha.

Intaas ka dibna waxaa lala kala wareegay qalabkii iyadoo dhinaca Golaha uu waraaqihii lagula kala wareegayay u saxeexay Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Mudane C/risaaq Siciid Ayaanle.

### **11. Golaha Wakiilada oo Gobolada dalka kuwada yeelanaya Xafiisyo.**

Golaha Wakiiladu wuxuu lixda Gobol ee Somaliland midkasta oo looga furay Xafiis uu Goluhu yeelanayo oo shaqeyn doona iyo Shaqaale, Xafiiskaas oo u qaabilsanaan doona Golaha dhamaan Baahiyaha Goluhu u yeesho Gobol kasta iyo sidoo kale inuu Mudanayaasha Gobolada laga soo doortey u fududeeyo wixii hawlo ah ee Goboladooda uga baahdaan.

Sidoo kale wuxuu xafiiskani qaabilsanaan doonaa xidhiidhka dadweynaha ee Gobolada JSL iyo Golaha Wakiilada taas wax weyn ka tari doonta Xidhiidhka Dadweynaha (Public Relations) iyo Golaha Wakiilada Shacabka ee ay soo doorteen.

### **12. Mudanayaasha Golaha oo loo sameeyay E mails iyo Business Cards.**

Waxaa intii fasaxa Kal-fadhiga Golaha lagu jiray dhamaan Mudanayaasha E mails ugaara Mudanayaasha Golaha Wakiilada oo Mudane kasta gaar u yeelanayo email ka kooban magaciisa tusaale [Mudane@somalilandparliament.net](mailto:Mudane@somalilandparliament.net) , waxaana laga sameeyay Websitka Golaha ee [www.somalilandparliament.net](http://www.somalilandparliament.net) .

Sidoo kale waxaa Mudane kasta uu Goluhu u sameeyay Business Card u gaara oo ay ku qoran tahay Macluumaadkiisa iyo Gobolka laga soo doortey, waxaa kal-fadhigan 22<sup>aad</sup> loo qeybin doonaa Mudanayaasha E mails iyo Business cards.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---